**Cabbirka is-qiimaynta**

| | A1 | A2 | B1 | B2 | C1 | C2 |
|---|---|---|---|---|---|---|
| **Garashada**<br><br>**Xariifnimada garashada** | Anigu waxaan garan kara erayada caadiga ah iyo jumlo gaagaaban oo fudud, kuwaaso ku saabsan aniga, qoyskayga iyo waxyaalaha agagaarkayga ka muuqda, laakinse waa haddii hab xasilan oo cad laygula hadlo | Anigu waxaan fahmi kara jumlo gaagaaban iyo erayada aad u fudfudud, kuwaaso xaalad-shaqsiyeedkayga ku saabsan, sida warbixin ku saabsan aniga, qoyskayga, deegaanka agagaarkayga ku yaalo, waxyaalaha nool-maalmeedka an qabto iyo shaqada. Anigu waxaan guud ahaan fahmi kara farimaha gaagaaban, cad oo fudfudud. | Anigu waxaan fahmi kara guud ahaan hadalada caadiga ah ee cad, kuwaaso ku saabsan waxyaalaha caadiga ah oo hab joogto ah qofka la kulmo markii u shaqadiisa, dugsigiisa, goobaha wakhtilummiska iwm u ku sugan yahay. Haddii hab tartiib oo cad ah loo hadlo, waxaa guud ahaan fahmi kara waxyaalaha laga shekeeynaayo barnaamijada raadiyoowga iyo telefishanka ku saabsan arrimaha markaas jira, ama arrin aniga gaar ahaan u xiseynaayo. | Anigu waxaan fahmi kara soo jeedin dheer, sida muxaadaraadka iyo la socon kara dood culus, haseyeeshe waa haddii arrintu ay tahay arrin an la socdo. Barnaamijyada caadiga badidooda iyo wararka telefishanka laga sii deeyo waan fahmi kara. Sidaaso kale ayaa u fahmaaya filimada badidooda waa haddii lagu hadlaayo luqad caadi ah. | Anigu waxaan fahmi kara luqad horumartay, xita haddii habdhiskeedu usan caddayn, xiriirkeeduna u yahay mid guud-mar ah oo hab cad ah an loo soo bandhigin. Hab fudud ayaan u fahmi kara hadalada barnaamijyada telefishanka iyo filimada. | Anigu wax dhib ah haba yaraate kuma qabo fahmida luqad lagu hadlay, ha ahaadeen xiriir toos, raadiyoow, telefishan ama filim. Sidaaso kale ayaa u fahmi kara hadal la boobsiiyay, ee ku hadlaayo qof dalka u dhashay, waa haddii qaabka gobolkaas luqada loogu hadlo an fahmay. |
| **Xariifnimada akhrinta** | Anigu waxaan akhrin kara magacyada caadiga ah, ereyada iyo jumladaha aad u fudfudu, sida kuwa ku qoran xayeeysiinta iyo kartoonada. | Anigu waxaan akhrin kara ereyo fudfudud oo gaagaaban. Waxaan heli kara warbixinada qaarkood ee an u baahanhay, fudud maamleed sida xayeeysiinta, qoraalada-waydiimaha, liiska cuntada iyo liisaska gaadiidka. Waxaan akhrisan kara oo an fahmi kara warqadaha shaqsiyeedka fudfudud oo gaagaagban. | Anigu waxaan akhrin kara ereyada oo badi ahaan lagu soo qora luqad horumartay, ku saabsan noolol-maalmeed iyo shaqo. Waxaan fahmi kara tilmaamida dhacdooyinka, dareemaha iyo codsashada ku qoran warqad shaqsiyeed | Anigu waxaan akhrin kara maqaalo iyo warbixinno ku saabsan dhibaatooyinka markaas jiraan, oo tilmaamaya hab-dhaqameed iyo fikradaha qofka u qabo. Waxaan fahmi kara qoralada sugaanta xilliyeeysan. | Anigu waxaan akhrin kara ereyada dhaaheer oo an sahlanayn, sida kuwa sheekooyinka ku qoran, waxaana kala garan kara sida qaabka u kala duwan yahay. Waxaan fahmi kara maqaalada xirfadaha iyo kuwa tilmaamada dhaadheer ku qoran, xita kuwa ku saabsan waxyaalaha aniga an xiisayn ama khibrad an u lahayn. | Anigu waxaan akhrin kara wax alle wixii qoraal ah, xita kuwa an la taaban karin, oo leh hab-dhiska luqeed oo dhibka badan, sida buugagga tilaamaha ku qoran, maqaaladaha xirfadaha ama sugaanta caanka ah. |
| **Hadal**<br><br>**Wada-hadal/isku-sheegida** | Anigu waxaan u hadli kara hab fudud, waa haddii qofka ii la hadlaayo uu hab tartiib ah ii la hadlo, diyaarna u yahay in uu hadalka igu soo celceliyo ama si kale igu macneeyo wixii uu yiri, ama iga caawiyo sidii an u oran laha. Waxaan waydiin kara oo ka jaawaabi kara su'aallo fudfudud, oo ah kuwo an xiisaynayo ama ku saabsan waxyaalo caadi ah. | Anigu waxaan ka qaybgeli kara wadahadal iyo hawlgallo caadi ah, oo u baaahan is-dhaafsasho warbixin fudud oo toos ah, ku saabsan arrimo la wada ogsoon yahay iyo hawllo. Waxaan ka qaybgeli kara wadahadallo bulshodeed aad u gaagaagban, laakinse anigu laf ahaantayda ma awoodo hogaaminta wadahadalka. | Anigu waxaan awooda in xaaladaha badidooda oo ka dhici kara dalal ama goobo luqadaas loogu hadlo kaalin ka geysto. Waxaan kari kara in is-diyaargarayn la'aanteeda, an ka qaybgalo wadahadallo aniga xiseeyo, ama xiriir la leh noolol-maalmeedka, sida qoys, waxyaalaha an xilliyada fasaxa xiseeyo, shaqo, socdaallo och dhacdoonka markaas jira. | Anigu waxaan la hadli kara oo ku doodi kara luqada hakad la'aam, taasoo ii suurtagelinayso in an hab caadi ah saaxiib la yeesho dadyoow dalka u dhashay. Waxaan aawooda in an hab firfircoon an ugu qaybgalo dood ku saabsan ammuur caan ah, oo an awoodo in an macneeyo ama difaaco aragtidayda. | Anigu hakad la'aan ayaan u orna kara waxa an doono, iyadoo sidaas layga dareemin in an baadidoonayo wixii an oran laha. Waxaan adeegsan kara isbedbedka luqada, iyo firfircoonida bulsheedka, xiseeyn iyo ujeedo-xirfadeedka. Waxaan kari kara dhisida fikradaha iyo aragtida leexleexasho la'aan, iyo u la qabsan habka u qofka kale u | Anigu dhib la la'aan ayaa wadahadalka iyo dooda aan doono ugu qaybgeli kara, sidaas hab firfircoon ugu dooran kara dhihid maalmeed oo ku habbon. Anigu hab wanaagsan oo hakad lahayn ayaa u hadli kara, anigo isla markaana quruxda hadalka an ka tegin. Haddii ay dhacda ba in dhibaato la kulmo, waxaan ugu gudbi kara anigoo adeegsado dib u |

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | hadlaayo. | jimladayn, iyado dhageystaha usan waxba iga dareemin |
| **Soo-saarka hadalka ku salaysan** | Anigu waxaan adeegsan kara jumlado iyo weero fudud, markii an doonaayo in an tilmaamo meesha an degenahay iyo dadyoowg an garanaayo. | Anigu waxaan adeegsan kara jumlado iyo weero fudud, sidii anigo ku tirsanaayo qaab sahlan ku tilmaamo qoyskayaga iyo dadyoow kale, qaabka dadyoowga kale ay u nool yihiin, warbarashadayda, hawlaha haatan an qabto iyo kuwii beri hore an qaban jiray. | Anigu waxaan hab fudud isugu xiri kara jumlado, kuwaasoo an ku tilmaami karo khibrado iyo dhacdoonno, riyadayda, rajooyinkayga iyo qorsheha mustaqbilka an ka leeyahay. Anigu iyado kooban ayaa keeni kara sabab iyo qeexinta aragtidayda iyo qorshehayga. Waxaan ka sheekayn kara sheeko, ama dhacdoono lagaga sheekaynaayay buug, filim, kuna tilmaami karo dareenkayga. | Anigu waxaan hab cad oo tafatiran tilmaami kara xaaladaha oo an xiseeyo ama khibrad an u leeyahay. Waxaan qeexi kara aragti, anigo markaas soo bandhigi karo faa'iidada iyo khasaarada aragtidaas ku salaysan xal kala duwan. | Anigu waxaan hab cad oo tafatiran tilaami kara waxyaallo dhib badan, kuwaso leh garab mowduc iyo dhihid kale. Anigu waxaan horumarin kara muqaallo gaar ahaaneed, iyo soo gabagabayn kara tilaamid leh gabagabayn isku si ah. | Anigu waxaan soo bandhigi kara tilmaamid cad oo hakad lahayn, ama ka doodid ku aadan ujeedada. Waxaan soo bandhigi kara habdhis firfircon oo caqligal ah, taasoo dhagaystaha u sahlinayso iftiimida iyo xasuusashada qodobada ugu muhimsana. |
| **Qorida**<br><br>**Xariifnimada qorida** | Anigu waxaan qori kara farimmo gaagaaban, fudud sida kaararka salaanta. Waxaan buuxi kara foom fudud, sida magac, adrees iyo jinsiyadayda. | Anigu waxaan qori kara farimmo gaagaaban, fudud iyo xasuus-qoryo fudfudud. Waxaan qori kara warqad shaqsiyeed aad u fudud, sida ereyo mahadcelinta ah. | Anigu waxaan qori kara qoraal fudud oo isku taxan ku saabsan arrin an aqoon u leeyahay ama an gaar ahaan u daneeyo. Waxaan qori kara warqad shaqsiyeed tilaamayso wixii an la kulmay ama sida dareenkayga u ahaa. | Anigu waxaan qori kara ereyo cad oo tafatiran ku saabsan waxyaalaha an xiseeyo. Waxaaan qori kara qoraal curis ah ama qoraal warbixineed gudbiya warbixinno, ama soo bandhigo wixii aragtidayda ah, ee ku wanaagsan tahay ama aysan ku wanaagsanayn. Waxaan qori kara warqad an ku muujinayo aragtidayada shaqsiyeed wajihan dhacdoonno ama khibrado. | Anigu waxaan qoraal cad oo aad u habdhisan ku muujin kara aragti aad u qeexan. Waxan qori kara warqad ku qoran warbixin xaalad aad u dhib badan, ama qoraal curis ah, ama qoraal-warbixineed, markaas kadib ka doodi kara waxa aniga ila muhimsan. Waxaan xulan kara qaab gaar ahaan ugu talo galay qofka qoraalka akhrisan doono. | Anigu waxaan qori kara, hab cad oo hakad lahayn iyo qaab maarkaas ku habboon. Waxaan qori kara warqad, qoraallo-warbixineed ama maqaallo ka kooban qaybo kala duwan, uu soo bandhigaya qodob hab caqligal ah, oo firfircoon, oo akhirsteha u sahlin kara sidii u ku xasuusto qodobadii ugu muhimsana. |